Tusaha Ka-Fayoobaanta Kutaan Sariireed

loola dan leeyahay Guryoleyda iyo Kireystayaasha

Waa Maxay Kutaan Sariireed?

Kutaan sariireeddu waa cayayaan ka quuta dhiig. Qaangaarka kutaan sariireeddu waa qaab-ukumeed, leh midab casaan ciideeda muggiisuna wuxuu dhan yahay mir tufaax oo weyn (dherer 1/4 inji). Da'yarta kutaan sariireeddu waa yaryar yihiin waxayna noqon karaan caddaan ilaa casaan ciideeda. Intayna quudan aad bay u fidsan yihiin, markiise ay quutaan waa wareegsan yihiin. Ukumahoodu waa caaddaan, qaab-beyr leh muggana dhan firin. Waxay ugu ururaan 10 ilaa 50 ukumood jeexjeexyada iyo tarrarrada. Kutaan sariireeddu baallo ma leh mana duuli karaan mana boodi karaan, waxayse awoodaan inay ku dhuuntaan meelo aad u yaryar oogadooda fidsan awgeed.

Waxay dhuuntaan maalintii hameynkiina dadkay goobaan si ay u qaniinaan. Qaniinyooyinka kutaan sariireeddu waa cuncun badan yihiin, waxayna sababaan dildilo casaana oo u eg kuwa qaniinyooyinka kaneecada. Kutaan sariireeddu ma gudbiyaan cudurro. Hase yeeshee, marka dadku isxoqo oo ay furaan nabarro waxay noqon karaan kuwo fasasa. Dadku waxay kutaan sariireedda guryahooda ku geeyaan inta badan boorsooyin wata, dhar, agab la adeegsaday, ama sariirayn. Ma jirto hal tillaabo oo meelmarina ama kiimiko ah oo loo adeegsan karo maamulidda kutaan sariireed.

Kutaan sariireed Quutay & Aan-Quudan oo ku Jira Marxalado kale Duwan oo Koritaan. *(Tixgelin sawir: Allison Taisey)*

Joojinta Dhibka Kutaan Sariireeddaada

1. Hel Halka ay Kutaantu Ku Sugan Yihiin

- Qaad DHAMMAAN go'yaasha sariirta, bustayaasha, galalka barkimooyinka iyo maryo kastoo sagxadda yaal si toosana ugu rid boorsooyinka awdan ee qashinka si loo dhaqo.
- Ku fatish sariiraha toosh si taxaddar lehna uga raadi kutaan sariireed astaameynta ku dhereran tolmooyinka joodariyaasha, gudaha santuuqa moollooyinka, fadhiga sariirta iyo gadaasha madaxyada. Caadi ahaan astaanta ugu horreysa ee hilnaanta kutaan sariireeddu waa astaamo casaan ciideeda oo ku yaalla joodarigaaga, santuuqa moollo iyo go'yaasha ay ka tagtay kutaan sariireeddu.
- Kutaan-sariireeddu way adkaan kartaa in la helo waayo aalaa waxay ku dhuuntaan jeexjeexyada iyo tarrarrada sida tolmooyinka joodariga. Waxaad marin kartaa shay fidsan sida middi saawir ah ama turub dusha jeexjeexyada iyo tolmooyinka si aad ugu qasabto inay dhuumashada ka soo baxaan.
- Gebi ahaan uga baar qolka jiifka oo ay ku jiraan huwisyadu, maryaha sagxadda, iyo agabka kutaan sariireed iyo astaameyn. Sii feejignaan dhow si loo adkeeyo meelaha laga yaabo in kutaan sariireeddu ku dhuumanayso sida alwaaxsaleedka, sallaxa leh hogag koronto, gadaasha warqodarbiyeedka dabacsan, inta u dhaxaysa iskuxirrada fadhiyada sariiraha iyo agabka kale, geesaha sajaadadaha, gadaasha alwaaxasaaleedka, gadaasha khaanadaha, gadaasha sawirrada darbiyaasha—wax kasta iyo shay walb oo qolka yaal kaas oo hilnaanta lagu arkay.

2. Saar Kutaan Sariireedda iyo Ukumaha Kutaan Sariireedda

- Adeegso nadiifiyaha fuuqsade (vacuum) wata bulay ku lifaaqan si aad u nadiifiso joodarigaaga, santuuqa moollo, fadhi sariir. Fuuqsadaha waxa ku jira waa in isla markiiba looga mariyaa dibadda oo lagu guraa boorso caaga, ka dibna la awdaa oo lagu ridaa haamaha qashinka ee dibedda.
- U adeegso shay fidsan sida middi saawir ah ama turub jeexjeexyada iyo tolmooyinka si aad ugu qasabto kutaantu inay ka soo baxdo dhuumashada aadna u awooddo inaad fuuqiso.
- Adeegso bulay xoqitaan kakan si aad uga saarto ukumaha tolmooyinka joodariga iyo jeexjeexyada iyo tarrarrada qodan ee kale.
- Fuuqi sagxadaha adeegsana qalabka tarrarrada ama naaska fuuqiyaha si aad u nadiifiso geesaha alwaaxsaleedka.

3. Dabool Joodarigaaga

- Hadda oo aad qaadday tillaabooyinkii nadiifinta sariirta, waa inaad markiiba ku dabooshaa joodariyaasha daboollo jiinyeer leh oo lagu suntay "lagu dhereriyey xajiin" ama "leh kutaan sariireed." Daboollada ugu fiican waa daboollada falagsan ee boolistarka. Kharash yaraanna waa bambiiro waxaa kaloo shaqeynaaya daboollada kale ee boolistarka, laakiin waxay u badan tahay inay dildillaacaan.
- Balaqa jiinyeerka ee ah dusha daboolka joodariga waa in lagu daboolaa cad koollo-dhuumeed ah (duct tape) si loo awdo tolanka.
- Kutaan sariireeddu waxay noolaanaysaa hal sano oo aysan quudaneyn, haddaba waxaa muhiim ah in loo daayo joodariga daboollada ugu yaraan labo toban bilood ka dib markii ay muuqatay in kutaan sariiraddu joojisay qaniinyooyinkii.

4. Dhaq Sariireynta, maryaha iyo shayada Kale

- Ku dhaq dhmmaan sariireynta iyo maryihii lagu boorseeyay Tillaabo 1 biyo kulul kuna rid qallajiyaha 20 daqiiqo si loo dilo kutaan sariireedda.
- Shayada dhogorta ah, qalabyada dheelista, kabo iyo kuwa kaloo ah shayo aan la dhiqin Karin waa in lagu ridaa qallajiyaha oo la gaarsiiyay meelaha ugu sarreeya ee heerkulkiisa 20 daqiiqo.
- Awd oo tuur boorsooyinkii loo adeegsaday keenista waxyaalihii la dhaqaayay.
- Maryaha dhaqan iyo go'yaasha waa in lagu kaydiyo boorsooyin awdan ama weelala caaga oo awdan ilaa dhibka kutaan sariireedda la joojinaayo.
- Dhaq oo qallaji dhammaan go'yaasha, bustayaalka, galalka barkimooyinka ugu yaraan mar ama labo jeer toddobaadkii.

Iska jir qaniinidda hameynkii:

- Ka saar joodarigaaga iyo saabka sariirta kutaan sariireed
- Ku dabool joodarigaaga iyo santuuqa moollada dabool gaar ahaaneed
- Hadba dhaq sariireyntaada
- Ka dhig sariirtaada jasiirad

5. Bannaanka dhig kutaan sariireedda-sariirtaada ka dhig jasiirad

- Ku meelee lugaha sariirta ClimbUp® Gaadayaal si aad uga hortagto in kutaantu kor u tafto lugaha sariirta. Kuwaan waxaa ka iibsan kartaa intarneedka. Ku rididda lugaha sariirta weelal biyo ka buuxaan oo leh dhibic saabuunta weelka ah ama saliid iyana way shaqeyn kartaa. Haddii aad haysato saajaadad godan, waxaad dhigtaa loox hoosta baaquliga si ay uga caawiso ka-hortagidda inay ku jeexanto culeyska sariirta.
- Haddii joodari kaliya kuu dul saaran yahay sagxadda, si maalinle ah sariirta u dhaq fatishna joodariga ilaa intaad ka karayso inaad sariirta u hesho fadhi lugo leh.
- Ka fogee sariirtaada darbiga si aysan sariirtaadu iyo sariireyntu (buste, go'yaal, iwm) u taaban darbiga.
- Raaracyada sariirta saar hubina inaan sariireyntu taaban sagxadda ama agabka kale.
- Waxna ha kor saarin (boorsooyin, maryo aan la dhaqin, qalab-dheeleed cukan) sariirna. Ahow mid aad u taxaddarsan markaad safar ka soo laabato-ka fatish boorsooyinkaaaga iyo shayada socdaalka kutaan sariireed.

6. Nadiifi isdhexdaadsanayaasha

- Suurtoggal maahan in la mariyo kutaan sariireedda iyadoon la marin isdhexdaadsanayaasha.
- Isdhexdaadsanayaashu waa wax kastoo adkaynaya in la nadiifiyo ama waa meesha dhuumashada kutaan sariireedda.
- Hinji, boorsee, dhaq oo qallaji dhammaan maryaha iyo shayada kaloo saaran sagxaddaada.
- Isdhexdaadsanayaal kastoo aadan u baahnayn waa in bannaanka loo tuuraa. Haddii aad wax bannaanka u tuurto, burburi, ama rinji ku buufi "Kutaan Sariireed-Ha Adeegsan" korka shayga oo leh xarfo waaweyn si uusan mid u qaadan oo u geyn gurigiisa.

Xog Guud
Xiriir Kowaad: Wac 211 ama 614-221-6766
Intarneed: www.centralohiobedbugs.org

Xoojinta Guryo Kireedka
Xoojinta afgaradka guryo kireedka wuxuu soo saaraa cayayaan maamulidda ay ku jiraan….
Magaalada Columbus: 614-645-3111
Franklin County: 614-462-3160

7. Hel Kaalmo Aqoomeed

- Adigu MA AWOODDID inaad iskaa u mariso kutaan sariireed
- Haddii aad kireysatay, waa inaad markiiba duqdhuleedkaaga u sheegtaa inaad leedahay kutaan sariireed.
- Adiga ama duqdhuleedkaagu waxaad u baahan doontaan inaad kireysataan baabi'iye shahaadeysan (hawlle maammul cayayaan) sida ugu dhoqso badan. In dheer oo aad sugtaa, waxay adkayn doontaa maamulidda hilnaanta.
- Duqdhuleedkaaga ayaa laga rabaa inuu qaato daryeelka maamulka cayayaan haddii aad ku nooshahay dhisme leh labo ama ka badan aqallood, haddii uusan aqalkaagu ahayn kan kaliya oo hilan. Dhammaan aqallada kore, hoose iyo kuwa ugu xiga kaaga waa in iyagana la daaweeyo.
- Haddii aad ku nooshahay dhisme hal qoys, adigaa ka mas'uul ah maamulidda cayayaan.
- Hawllaha maamulidda cayayaan waa inuu fatasho gurigaaga kuna siiyo tilmaamaha kahor-baabi'inta kuwaasoo ay tahay inaad si dhammaystiran u raacdo. Waxaa kan ku jiri kara:
    - Ka saar gurigaaga isdhexdaadsanayaal ka hor intaysan imaan.
    - Saar, dhaq, boorseena dhammaan maryaha oo ay ku jiraan maryaha lagu kaydiyey labbisayaasha.
    - Ka dhaqaaji agabka darbiyada.
    - Waxay kaloo ku weyddiin karaan inaad boorseyso shayo kale sida buugag, dheeliyaal, ama isdhexdaasane kale.
    - Wax kastoo la boorseeyay oo aan la nadiifin waa in si aada loogu awdaa boorso qashimeedda hawlaha culus, ama boorso kale oo si aada loo awdi karo oo aan jeexmayn.

Su'aalaha Aalaa la Isweyddiiyo

Suntee baan adeegsan karaa?

Jawaab: Sunta lagu iibsho dukaanka maahan mid si aada wax uga tari karta kutaan sariireedda. Budada Boric acid xitaa wax kama tarayso kutaan sariireed. Kutaan qarxisooyinka iyo ceeryaameeyayaalku iyaguna dhab ahaantii dhibka way sii badiyaan waayo waxay ka dhigaan kutaan sariireedda kuwo ku firira hogagga darbiga iyo meelaha kale ee guriga. Fuuqinta kutaan sariireedda intii lagu buufin lahaa sun waa waddada ugu nabdoon oo lagu maamuli karo cayayaanka.

Waxaan ku talinaynnaa inaad uga tagto codsiga suntan hawllaha maamulidda cayayaanka ee shahaadeysan. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad go'aansato inaad adigu adeegsato suntan, hubi in summaddu leedahay waxaa loo adeegsan karaa kutaan sariireed si aad u nabdoonaato si sharciyaysanna u adeegsato. Dhibco muhiim ah:

- Si aada u raac tilmaamaha summadda ee ah sida loo adeegsado.
- Si loo yareeyo halista dadka, kaliya si toos ah suntan ugu jeedi kutaan sariireedda.
- Adeegso burqiso gacameed intii aad adeegsan lahayd buufisada ayrasool, haddii aysan buufisada ayrasool lahayn dhuun kordhinaysa in lagu buufiyo jeexjeexyada iyo tarrarrada.
- Boor suncayayaaneed ah baa lagu waxayn karaa alwaaxsaleedka iyo hogag koronteeda.
- Waligaa ha adeegsan qarxiyayaal iyo ceeryaameeyeyaal.
- Waligaa ha ku waxayn suntan korka joodariyayaasha, fadhiyada, ama meelaha carruurta ama dabjoogtu aadaan.

Haddii aad ku guuleysan waydo inaad maamusho kutaan sariireedda laftaadu, tani waxay gadaal dambe ku adkayn kartaa hawllaha maamulidda cayayaanka waxayna ku dhammaan in kharashku bato.

Ma u baahanahay inaan bannaanka u tuuro joodariyaashayda iyo agabkayga?

Jawaab: Maya, bannaan u tuurista joodarigaaga ama agabkaaga ma dhammayn doonaan dhibka kutaan sariireedda. Haddii joodarigaaga ama fadhigaagu leeyihiin kutaan sariireed, waxay kaloo ku nool yihiin meelaha kale ee guriga. Agab kasta oo kalaad keento guriga wuu yeelan doonaa kutaan sariireedda.

Weyddii hawllahaaga cayayaan maamulidda inuu jiro waxaad u baahan tahay inaad bannaanka u tuurto. Xitaa haddii agabkaagu sida fadhiga uu leeyahay kutaan sariireed, hawllaha maamulidda cayayaan wuxuu awoodi karaa inuu daaweeyo. Haddii aad u baahato inaad bannaanka u tuurto wax uun, burburi, ama ku kor buufi rinji "Kutaan Sariireed" shayga kaasoo leh xarfo waaweyn si aan qof u qaadan oo uusan gurigooda u geyn. Ha keensan agab cusub ilaa inta hawllaha cayayaan maamuliddu uu ka dhammaynayo daaweynta gurigaaga oo aad ka hubsanayso in kutaan sariireeddii tagtay.

Sidee saaxiibbada iyo xigtadu uga fogaan karaan inay ka qaadaan kutaan sariireed gurigeyga oo aysan u geyn kuwooda?

Jawaab: kutaan sariireeddu waxay ka safri kartaa guri ilaa qof kale dharkiisa, boorsogacameed, boorsooyin, ama sanaatiiq, ama shayo qofeed kale. Saaxiibbo iyo xigtaba waa inay tillaabooyinkaan qaadaan marka ay soo booqanayaa gurigaaga ilaa intaad ka dhammaynayso dhibka kutaan sariireedda:

- Ha keenin boorsogacameedyo, boorsooyin, sanaatiiq, ama shayo qofeed kale.
- Hadday suurtoggal tahay, ka fagow inaad ku fariisato agabka jilicsan sida fadhiyada.
- Waa inay iska saaraan, dhaqaan qallajiyaanna maryahooda isla marka ay guryahooda ku noqdaan. Haddii aysan haysan dhaqe iyo qallajiye, ha ku guraan maryaha boorso si aada u awdan ilaa laga dhaqaayo oo laga qallajinaayo.

Sidee u doortaa shirkad cayayaan?

Jawaab: Wac seddex ama ka badan oo shirkadood si aad fikrad uga hesho inta ay kharashadu yihiin iyo adeegyada ay hayaan. Su'aalaha la weyddiinaayo waxaa ku jira:

Shirkaddu ma shatiyeysan tahay mana caynsan tahay?
Kaliya shatiyeysne iyo u-tababarne hawllayaasha maamulidda cayayaan baa ka hawlgeli kara Ohio. Hubi inay caynsan yihiin lacalla hadduu dhib dhaco.

Maxaa shirkadda u qorshaysan inay sameyso?
Shirkaddu waa inay awooddaa inay sharraxdo tillaabooyinka ay qaadayso si ay wax uga qabato dhibabka kutaan sariireedda. Waxay kaloo u baahan yihiin inay khibrad u leeyihiin hilnaanta ka jirta jaadka dhisme oo aad ku nooshahay.

Ma adeegsadaan IPM?
Maareynta Cayayaan ee Dhan (IPM, Integrated Pest Management) waa sida loogu dhaqaaqo maareynta cayayaan taas oo ku taxalluqda ku-dhaqaaqidda yare ee sumeed oo loo maamulo cayayaanka si loo dhawro dadka guriga jooga. Iyadoo ku-dhaqaaqiddaan loo adeegsan doono kiimikada kutaan sariireed, haddana waxay ku lug yeelan kartaa awdista jeexjeexyada iyo tarrarrada, fuuqin, ku-waxaynta kulayl iyo qiiq ingagan, awdista joodariyaasha, iyo waxyaalaha kale oo aan kiiimiko lahayn.

Ma yahay sicirku mid la qaadan karo mana ku doorsoomaa adeegga?
Shirkaddii ballanqaad maamulid ku fidisa dhawr booqasho ama tiraahda waxaan hayaa kiimiko maamulid maahan daacad. Sicirku waa inuu doorsoomaa oo ku qotomaa jaadka guriga, heerka hilnaanta, iyo jaadka IPM ee aad raadinayso.

KA WARQAB haddii shirkadda maamulidda cayayaan:

- Ayna muujin karin caddeynta shatiga dawladda ee Waaxda Beeraha ee Ohio.
- Ayna muujin karin caddaynta u-qoolnaanta iyo caymiska dhaawaca hantida.
- Ay adeegsato tiro taleefan oo aan qornayn ama cinwaan.
- Gabto inay ka jawaabto su'aalahaaga.
- Iksu daydo inay ku cabsiiso ama kugu dirqiso inaad saxiixdo heshiis iibin.
- Ay albaabkaaga hor timaaddo adoon u yeeran oo ay kaa tusto caddayn kutaan sariireed dariska gurigaaga cududdaar ahaan si ay u fiiriso gurigaaga.
- Ay ku andacooto inay hayso hab qarsoodi ah ama walax.
- Ay tiraahdo shirkadaha kale waa sharcidarro ama ma bixiyaan maamulid.
- Ay hayso sicir aad uga yar kan shirkadaha kale.
- Ay ku andacooto ka "dhawritaan" ama "awditaan" gurigaaga hilnaannada.
- Ay yiraahdaan waxaan haynnaa kiimiko shaqo kale ka soo hartay waxaanna ku siinaynnaa tixgelin.
- Ay yiraahdaan waxaa na aqoonsan magaalada, dawladda, ururka maareynta cayayaanka. Aqoonsigu maahan sida shatiga oo kale.
- Soo jeediso dhimis ama khidmad shaqooyin kale u geysa.